**Jamhuuriyadda Feedraalka Soomaaliya**
**Baarlamaanka Fedraalka Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Hadal-qoraalka kalfadhiga Kol.3-aad**
**Ducomentiga Kol.3-aad/F.12-aad/2013** **08/10/2013**

**Kalfadiga 3-aad**
**Kulankiisa 12-aad,sac.Fur 11:49gh-sac.Xir 02:40gd.**
**Guntinta:154**
**Ajendaha:**

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Akhrinta 1-aad ee Hindise sharciyeedka Bankiga Horumarinta**
4. **Qeybinta :-**
    a) Heshiiska (Favouri) Nuqulka Ingiriiska ah
    b) Talsoo jeedinta Guddiga Xeer-Hoosaadka loo xilsaaray

**Shir-guddoomiye Guddoomiye ku-xigeenka1aad ee Golaha shacabka Mudane Jeylaani Nuur Iikar,**waxaa shirka furay Guddomiye k/x/1aad Mudane Jeylaani Nuur Iikr ,uuna akhriyay xil.Shaacir.
Kadib, Guddoomiyaha wuxuu codsaday in la ansixiyo ajandaha xildhibaanadana way ansixiyeen.

**Xil.Cabdi Xaashi**(point of order)wuxuu sheegay in Baarlamaanka la horkeeni Karin heshiis ay dowladda la gashay shirkado. Haddii aan ku qorneyn Af-Soomaali.wuxuu mataal ahaan u soo qaadey in heshiis la galay uu dagaal keenay wuxuuna ka dhacay Dalka ETHOPIA(DAKA)Qarnigii 19aad Adduwa –heshiiskaa oo Ithopia la gashay Dalka Talyaaniga.
**Xil.C/qaadir Cosoble**:wuxuu seken gareeyey Xil.Cabdi Xaashi soona jeediyay in laga saaro Ajendaha.
Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in Heshiiskaan (Favori) laga saaro Ajendaha.
Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Wasiirka Dowlaha Maaliayadda oo Actin gareenayo Wasiir ka Wasaaradda Maaliyadda Mudane Maxamed Rashiid:wuxuuna akhriyay Hindise Sharciyeedka Bankiga Horumarinta.
Kadib,Guddoomiyaha Bankiga Mudane Afrax wuxuu sheegay marka ay dowladda u dhiibtay xilka in ay ku sameeyeen Bankiga baaritaan,waxa uu bankiga lahaan jiray ,sida Beeraha,iyo Guryaha. Wuxuu intaa ku daray in la waayay Documentiga uu isticmaali jiray Bankiga .waxaa Deymanka uu qabo Bankiga lagu tilmaamaa ilaa $3000,000.wuxuu kale uu lahaa Deyman uu ku leeyahay Bankiga Dadweynaha sida: horumarinta Beeraha iyo Guryaha .waxaa uu intaa ku daray in ay soo raacsiiyeen dhamaan Shuruucdii Bankiga uu lahaa,waxay qabteyn waxaa ka mid ahaa :

1.-in ay soo qeymeeyeen hantida maguurtada ee Xamar ,waana la soo sawirey waxaana loo sameeyey GPS.
2.-Warshadaha sida warshadda Baastada iyo qalabka Kaluumeysiga .
3.-Waxay ku guuleysatey Bankiga Afrika (African Development Bank).
Wuxuu sheegay oo kale ,in ay daraaseyeen Dadka Maalgashaday Bankiga oo ajaanibta ahaa ,waxay kaloo soo uruuiyeen dad aqoonyahano ah oo ku taqasusay Shareecadda Islaamka ,sida uu Dastuurka qabo;wuxuu intaa ku darey in Bankiga uu shaqeynaayo ,kuna shaqeynaayo nidaamka ay ku shaqeeyaan Bankiyada Islaamiga ah.
Kadib waxaa bilaabatey ssu'aal weydiintii Xildhibaanada:-

**Su'aal**

- Xil. Maxamed Cabdi yuusuf wuxuu sheegay in Bankiga uu ahaa Banki Caalami ah wuxuuna u baahanyahay in la dabagalo sida:
  1.-Hantidii lahaa
  2.-Beerihii lahaa
  **3.-**Guryihii lahaa

**Xil. Maxamed C/laahi K aamil** wuxuu sheegay in la raadiyo dadkii Deymaha ka qaadan jiray Bankiga horumarinta , Wuxuu weydiiyey Hay'adaha Caalamka oo siinkara deyn ma jiraan?haddey siyaan ma waxay naga doonayaan Dulsaar(Interest). Bankiga mahayaa Culumadii ku saleyn lahaa Shareecadda Islaamka.? Deymankii lagu lahaa Bankiga Soomaaliya maxaa laga yeelayaa?

**Xil. Faarax cawad** wuxuu sheegay iney tahay qeybtii Afaraad ee la keenay waxaana lagu kordhiyay dib u dhiska.

1. Dib- u- dhiska
2. Iyo deymanka

**Jawaab**

## Guddoomiyaha.Bankiga

- Wuxuu sheegay wixii bankiga uu lahaa way soo sheegeyn wayna hayaan, lakiin waxay u tagi-waayeen amni xumo darteed. Ducomentiyada ku qornaa deymaha wey raadiyeen laakiin wali maysan halin,way kudaba jiraan.
- Wuxuu kaloo sheegay nidaamka islaamiga ah ee uga hirgashay Aduunka,wuxuuna cadeeyay iney u joogaan Aqoon yahanada waxaana ka mid ah Jeesow oo mastar kasoo qaatay jaamacadda Islaamiga dalka masar ee Qaahira.
- Waxay dowladda leedahay 51% raasumaalka Bangiga horumarinta.

# Su'aal

Xil. Dhalxa Wuxuu weydiiyay lacagaha ay dibada u yaaliin Dowladdii bur burtay,majiraan wax lacag ah ay u yaaliin wadamada Aduunka sida wadanka jabuuti.

Xil. C/qaadir Sandheer Wuxuu sheegay in bankiga uu lahaa qiimo badan lahaa sida: Beero, Guryo wuxuu soo jeediyay in lasameeyo:

1. Guddi soo baara deymaha uu siiyay beeraha iyo guryaha
2. Iney sheegaan wixii horumar ah ay ku horumarinayaan
3. Bankiga kale tartan mala gali karaa
4. Xagga nidaamka islaamiga sidee buu bankiga ula qabsan doono

Xil. Ibraahin Ilka Case wuxuu sheegay in laga reebo dib u dhiska ee loo daayo bankiga horumarinta. Sidee baa lagu kala saari karaa bankiyada Islaamiga iyo kuwa kale.?

**Jawaab 2-aad**

**Guddoomiyaha .Bangiga**

Wuxuu soo jeediyay in lacagaha la weydiiyo wasiirka maaliyadda iyo Guddoomiyaha bankiga dhexe.wuxuu kaloo sheegay inay leeyihiin deymo fara badan oo raadkooda la yaqaano,sidoo kale lagaha Sudan waxaa laweydiinayaa Bankiga dhexe,intaa wuxuu ku daray bankiga inuu leeyahay Damaanad ama raad raac.

Wuxuu kaloo sheegay inay isu keeneyn dadkii bankiga u shaqeyn jiray si ay u soo bandhigaan fikradahooda qoraal ahaan, wuxuu bankiga qaatay nidaamka Islaamiga, aduunkana waa uu qaatay.

## Su'aal 3-aad

Xil Xeyd. Wuxuu soo jeediyay maxaa nooga furan in soomaaliya deymanka lagu leeyahay laga cafiyo, iyo qaabkee lagu soo qaadi karaa lacagaha kamaqan wadanka.

Xil. Maryan Cariif Qaasin waxay sheegtay inuu deyn siin jiray Beeraha Guryaha,wuxuu soo jeedisay in Baarlamaanka loo micneyo Bankiga horumarinta, waxay intaa kudartay hadday doonayaan bankiga in loo ansixiyo ay micneyaan Dib-u-dhiska

## Jawaab 3-aad

**Guddoomiyaha.Bangiga**

- Wuxuu shaagay inay Jabuuti u yaaliin hanti fara badan sida: Hoteka Camdhisk waxa lagu dhisay 80% iney leedahay Soomaaiya

- In deymanka maqan lagu heli karo Documenti cad haddii kale aan la hali karin,
- wuxuu kaloo intaa ku daray in bankiyada aduunka qaar kamid ah way lasoo xiriireyn ayagoo rabo sida Bankiga uu u shaqeeyo inay ula shaqeeyaan, Bankiga waxma cafiyo laakiin Dowladda deynta leheyd ayaa cafiso.Bankiga wuxuu ku aftirsanayaa wasaaradda Maaliyadda wuxuuna intaa kudaray inuu ka warsugayaan cida loo nisbeyn doono bur-burkaan iyo xaaladaan lagu sugan yahay markii la arko ayaa kalifeysa ayaa dib-u-dhiska in lagu daro.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegay in ay adkeeyaan markii akhrinta labaad lagaaro erayga Dib-u-dhiska laga doonayo inoo micneeyo Guddoomiyaha Bandhiga. Wuxuu kaloo uu sheegay iney guddiyada ay soo dadajiyaan akhrinta labaad.

Guddoomiyaha wuxuu guddiyada uu u faray

1. Guddiga Maaliyadda uu la kulmi doono 10-11Am
2. Guddiga kheyraadka uu lakulmi doono 12-13pm
3. Guddiga joogtada uu la kumi doono 04:00pm
4. Guddiga Dastuurkana uu diyaariyo warbixintii ay ku balameyn maalinta Axadda.

**Shir-Buddoomiyaha Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari ayaa wuxuu sheegay inuu shirka xiran yahay saacadda markey ahayd 01:40pm.**